


Ujeeddada: Kani wuxuu bixinayaa tilmaamo aasaasi ah oo ku saabsan sida loo isticmaalo OR PTC DCI Mareegta Taleefanka Gacanta.

Natiijada: Isticmaaluhu wuxuu awooddaa inuu galo oo isticmaalo OR PTC DCI Mareegta Taleefanka Gacanta.

Si aad u tagto OR PTC DCI Mareegta Taleefanka Gacanta

1. Fur browserka mareegta ee telefoonkaaga (Safari, Chrome, iwm.).
2. Dhex mushaax mareegta: orptc.dcisoftware.com.
3. Ku gal Magaca Isticmaalaha iyo Furaha Sirta ama PIN-ka ee aad leedahay.
4. Dooro Gal.
5. Bogga xiga ee soo bixi doona waa Caddaynta Bixiyaha. Aqri, hoos u wad ilaa qaybta dambe boggan, oo xulo Haye.
6. Bogga xiga ee soo bixi doona waa Ogeysiinta Isticmaalka Nidaamka. Aqri, hoos u wad ilaa qaybta dambe boggan, oo xulo Haye.



Fiiro gaar ah: Ha adeegsan Internet Explorer.





7. Marka aad gasho mareegta, dhammaan qoraallada wararka waxay ka soo bixi doonaan shaashadda hore. Waad dooran kartaa mid kasta si aad u aragto tafaasiisha ama u furto wax badan si aad dib ugu eegto qoraallada wararka oo dhan.

Hambalyo! Waxaad ku jirtaa OR PTC DCI Mareegta Taleefanka Gacanta.

Dhex Mushaaxida Mareegta Taleefanka Gacanta




1. Geeska sare ee midig ee shaashadda, waxaa ku yaala saddex xariiq oo toosan. Tani waa astaan-sawireedka liiska boggaaga.
 - b. Bogga Hore
 - t. Qoraal Cusub
 - j. Hubinta Oggolaanshaha
 - x. Qoraallada
 - kh. Farriinta
 - d. Raadinta
 - r. Ka Bax
2. Marka aad doorato liiska bogga, waxaad arki doontaa ikhtiyaarada soo socda:

Fiiro gaar ah: Haddii aad isticmaali doonto isla aaladdan si aad u gasho cinwaanka, dooro sanduuqa “I Xasuusnow” si aad u keydsato magaca isticmaalaha ee aad leedahay.






Ku dar Waqtiga Gelitaanka ee Cusub

1. Si aad ugu darto Gelitaan Cusub, ka xulo Gelitaan Cusub liiska boggaga.
2. Dhammaystir foomka Gelitaanka Cusub. Hubi in nooca diiwaanka waqtiyeed yahay Saacadle.
3. Ku bilow inaad ku qorto magaca cidda macmiilka kuu ah Sanduuqa macmiilka, kadibna dooro magaca macmiilka marka fallaarta hoos u baxda ay soo baxdo.
4. Hubi in koodhka adeegga ee saxda ah la xushay, haddii loo baahdo (waxay u badan tahay inay si toos ah isku buuxiso).
 - b. Hadduu macmiilku dhowaan beddeshay barnaamijyada, waxaa laga yaabaa inaad aragto laba lambar oo adeeg. Hubi inaad xulatay xeerka adeegga ee saxda ah iyadoo aad ku salaynayso barnaamijka macmiilka ee aad saacadahiisa dalbanayso.
5. Xulo taariikhda gelitaanka.
6. Waxaad arki doontaa tirada saacadaha la heli karo ee ku jira muddada oggolaanshaha adeegga ee su'aashu ka taagan tahay. Hubi inaad haysato saacado buuxa oo ku filan gelitaanka aad sheeganayso.
7. baxda. Si aad u geliso waqti gaar ah, mar labaad ku dhufo goobta aad rabto inaad fallaarta gayso. Kadib waad tirtiri kartaa waxaadna qori kartaa waqtiga bilawga ee saxda ah.
8. Waqtiga Bixitaanka: geli waqtiga dhammaadka adigoo isticmaalaya liiska hoos u baxa ama adoo qoraya waqtiga.





9. Xulo Ka Bax Boortalka.
10. Ku dar koodhka sababta adoo ka bilaabaya Bixiyaha oo sheegaya sababta aad u samaynayso gelitaankan taariikhda leh.
 - b. Guji calaamadda isku-tallaabta buluuga ah.
 - t. Ka xulo koodhka sababta liiska hoos u baxa ee sida ugu fiican u matalaya sababta aad u samaynayso gelitaankan taariikhda leh. Bixiye ahaan, waa inaad xulato koodhka sababta adoo ka bilaabaya Bixiyaha.
 - j. Ku dhufo calaamadda isku-tallaabta weyn ee buluugga ah. Haddii aadan calaamadda riixin, koodhka sababta si sax ah looma raacin doono gelitaanka, mana la keydin doono.
 - x. Haddii koodhka sababta la raaciyay gelitaanka, waxaad arki doontaa isagoo ka hooseeya sanduuqa Xulo Sababta.



11. Ku dar Xusuusino iyo Lifaayo. Tani waa ikhtiyaari.
12. Sax sanduuqa ku xiga bayaanka caddaynta si aad u xaqiijiso in waqtigaagu yahay.
13. Ku Dhufo Keydi.
14. Ku Dhufo Haa oo ku taala digniinta aad u dhammaystirto keydinta.

sax
si




Eeg, Xaqiiji, Diid Gelitaanada

1. Liiska boggaaga, ka xulo ikhtiyaarka Gelitaanada.
2. Bogga gelitaanka ayaa soo bixi doona, hadda waxaad awood u yeelan doontaa inaad aragto gelitaanada oo aad xaqiijiso xaaladda gelitaan kasta. Haddii aad ku dhufato gelitaan gaar ah waxaad awoodi doontaa inaad xaqiijiso ama diido gelitaanka gaarka ah. Xulo gelitaanka aad jeclaan lahayd inaad dib-u-eegis ku samayso.




3. Haddii diiwaanka waqtiyeed aan la Xaqiijin, waad Xaqiijin kartaa ama Diidi kartaa diiwaanka waqtiyeed.
4. Haddii diiwaanka waqtiyeed laga baaraandegayo, weli waxaad haysataa ikhtiyaar aad ku diidi karto gelitaanka adoo gujinaya badhanka diidmada. Haddii gelitaanku khaldan yahay, waad tirtiri kartaa adigoo ku dhufanaya Diid.



Fariimaha/Sanduuqa Farriimaha

1. Liiska boggaaga, ka xulo ikhtiyaarka farriimaha. Waxaad sidoo kale heli doontaa meel aad ka arki karto oo aad ka aqrisan karto farriimaha ama digniinaha lagu soo diro.
2. Liiska hoos baxa ee ka hooseeya ikhtiyaarka Farriinta, waxaad ku qori kartaa farriin cusub waxaadna ka arki kartaa Sanduuqa Farriimaha/Farriimaha La Diray/Keydka/Farriimaha La Tiray ee aad leedahay.
3. Si aad u aragto fariimaha cusub oo dhan, xulo “Sanduuqa Farriimaha”. Dhammaan fariimaha kuugu jira sanduuqa farriimaha ayaa soo muuqan doona.
4. Halkan, waxaad ka arki kartaa tafaasiisha farriinta adoo gujinaya farriinta aad rabto inaad aragto.



Fiiro gaar ah: Xiddig jaalle ah oo ku taala dhinaca farriinta ayaa muujinaysa in loo soo diray sidii farriin mudnaan sare leh ahaan.